



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

02/18/2022

Ku socota: Shaqaalaha ODDS iyo Hawl wadaagayaasha

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Warbixinta nidaamka maamulka kiiska iyo macluumaadka cusub ee mashruuca

Hadafka koowaad ee [gorshaha istiraatijiyadeed ee Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka \(ODDS\)](#) waa in la abuurto nidaam si fudud loo isticmaali karo. Mashruuca Qorshe Dejintu wuxuu diiradda saarayaa hadafkaasi wuxuuna wanaajin doonaa sida uu maamulka kiisku u egyahay iyo dareenka uu u leeyahay carruurta iyo dadka waaweyn ee ku nool Oregon.

Si la iskugu wargeliyo oo loo hago mashruucani, ODDS waxay qandaraas la yeelatay Shaqaalaha Maamulka Caafimaadka (HMA) si loo ogaado awoodaha nidaamka maamulka kiiska ee Oregon iyo si loo sameeyo talo soo jeedin ku saabsan waxa si fiican loo qaban karo. Sanadkii la soo dhaafay, waxaanu dib u dhignay warbixintii kama dambeysta ahayd iyada oo sababtu ahayd cudurka baahsan iyo baahi loo qabay in qof kastaa diiradda saaro shaqada muhiimka ah ee ka dhigista dadka qaba I/DD kuwo badbaado qabo. Waxaanu diyaar u nahay in aanu sii dayno warbixintani loo yaqaano “[Warbixinta Nidaamka Maamulka Kiiska ee Oregon ee loogu talagalay Dadka Qaba Naafanimada Maskaxda/ Korriinka.](#)” Waxaa la helayaa in laga akhristo website-kayaga iyada oo ah Ingiriisi waxaana iyada oo ku qoran luqado badan la heli doonaa dabayaaqada Diisambar ama horraanta Janaayo.

Warbixintan waxaa ku jira dib u eegista nidaamka gudbinta adeega maamulka kiiska ee ODDS, oo ah qiimeynta awoodaha iyo fursadaha

loogu talagalay wax hagaajinta, iyo talo soo jeedin ku saleysan khibrada HMA, aqoonta hababka ugu fiican ee wax loogu dhaqmo, iyo habab hal abuur leh oo laga soo qaatay gobolada kale. Intaasi waxaa dheer, in ODDS ay HMA, CDDP iyo Hay'ado kala shaqeynayso warbixin gooni ah oo loogu talagalay Sharci-dejinta oo ay ku jiri doonaa talo soo jeedin ku saabsan siyaabo wanaagsan oo lagu maalgeliyo maamulka kiiska. Warbixintan ayaa ku beegan Diisambar 2022.

Iyada oo hore loo sii soconayo, labada warbixinba waxay nagu hagi doonaan shaqada socota ee aanu la leenahay Mashruuca Qorshe Dejinta si loo wanaajiyo maamulka kiiska ee ka tirsan nidaamka kiiska ee I/DD ee Oregon.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty  
Agaasimaha  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

*Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa*

<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo [www.oregonrelay.com](http://www.oregonrelay.com) ama [www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers](http://www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers).